**IIB MA GALO**

# FAAFIN RASMIAH

# الجريدة الرسمية

**EE JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA**

Sannadka 15aad Muqdisho, 1 Juunyo 1987 Lr.6

**Laanta Faafinta Rasmiga ee Madaxtooyada Jamhuuriyadda D. Soomaaliya**

**FAAFIN BIL SOO BAXA** جريدة شهرية

**QIIMUHU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto wuxuu ka bilaabmaa 1 Jannaayo. Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

# KOBNIIN

## QAYBTA KOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 9 ee 17 Jan. 1987,
Sharciga Dhismaha Warshadda Daawada...... Bog. 328

## QAYBTA LABAAD

### XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS Lr. 18 ee 1 Maajo 1987,
Abaalmarino Billadeed .............................. 332

XEER MADAXWEYNAHA JDS Lr. 19 ee 19 Abr. 1987,
Magacaabid, kala beddelid & dib u celin
Hawlwadeenno .............................. 334

XEER MADAXWEYNAHA JDS Lr. 20 ee 6 Maajo 1987,
Mashaariicda Kaalmada Talyaaniga ENFAIS ....... 335

# QAYBTA SADDEXAAD

## TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH


MAXKAMADDA G. BANAADIR, 13.5.87,
Lumid Jeeg War. L. 0353916 ku qoran
Cabdiraxmaan Sheekh Daa'uud Lr. 127 .............. 337

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 16.5.87,
Lumid Jeeg War. L. 0112814 ku qoran Cabdiraxmaan
Maxamed Cali Lr. 128 .............................. 338

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 23.5.87,
Lumid Jeeg War. L. 0783758 ku qoran Cabdulqaadir
Maxamed Muuse Lr. 129 ............................ 339

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 22.4.87,
Lumid Jeeg War. L. 615861 ku qoran Wasaaradda
Xannaanada Xoolaha Lr. 129 ...................... 340

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 3.5.87,
Lumid Buug Kayd L. 52 ku qoran Maxamed
Cilmi Cawad Lr. 131 .............................. 342

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 21.3.87,
Lumid Jeeg War. L. 27118 ku qoran Maxamed
Saciid Axmed Lr. 132 ............................ 343

MAXKAMADDA G. TOGDHEER, 5.5.87,
Lumid Jeeg War. L. 0459553 ku qoran Canbaro
Axmed Cilmi Lr. 133 .............................. 344

MAXKAMADDA G. HARGEYSA, 22.2.87,
Lumid Jeeg War. L. 0265960 ku qoran Axmed
Cali Miigane L. 134 .............................. 345

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 29.3.87,
Lumid Buug Kayd Lr. 478 ku qoran Maxamed
Nuur Xasan L. 135 ................................ 346

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 24.5.87,
Lumid Jeeg War. Lr. 046900 ku qoran Ciise Cabdi
Rooble L. 136 .................................... 347

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 25.5.87,
Lumid Jeeg War. Lr. 0435381 ku qoran Cabdullaahi Jaamac Nuur L. 137 .......... 348

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 23.5.87,
Lumid Jeeg War. Lr. 502966 ku qoran Xabiiba Maxamed Yuusuf L. 138 .......... 349

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 1.6.87,
Lumid Jeeg War. Lr. 0307902 ku qoran Cabdi Maxamed Cali L. 139 .......... 350

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 31.5.87,
Lumid 3 Jeeg War. ku qoran Saciid Maxamed Yaasiin L. 140 .......... 351

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 1.6.87,
Lumid 2 Jeeg War. Lrs. 0779346-0781552 ku qoran Caudulle Cabdalla Jaamac L. 141 .......... 352

MAXKAMADDA G/TOGDHEER BURCO, 25.5.87,
Lumid Buug Kayd Lr. 2913/7 ku qoran Ibraahim Qaalib Guutaale .......... 353

SHIRKADDA "SOMALI BOTTLING COMANY" Hargeysa
Isku yeerid Shir Guud caadi ah Caadi ahayn .......... 354

# QAYBTA KOOWAAD

## S H A R C I

**Sharci lambar 9 ee 17 Jan. 1987,**
**Sharciga dhismaha Warshadda Daawada.**

MADAXWEYNAHA J.D.S

ISAGOO TIXGELINAYA: Oggolaashaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

**WUXUU SOO SAARAYAA**

Sharciga soo socda :

Qod. 1aad
*(Dhismaha Warshadda Daawada)*

Waxaa si rasami ah loo abuuray laga bilaabo 1da Febraayo 1986, Warshadda Daawada oo ah Hay'ad madax bannaan oo leh jiritaan iyo shakhsiyad qaanuuni ah, waxayna ku habeysan tahay Sharciyada Hay'adaha Dawladda iyo isbedelladii ka dambeeyey.

Qod. 2aad
*(Ujeeddada Warshadda)*

Ujeeddooyinka Warshaddu waa kuwa soo socda :

1. In ay soo saarto dawooyinka kala duwan oo lagu daryeelo caafimaadka bulshada.

2. In ay dibedda ka keento alaabta ceyriin, qalabka dayactirka iyo wixii la leh tacab soo saarka Warshadda.

3. Waxaa ay soo saarto Warshaddu ee ka bata baahida Dalka waxay toos uga iibineysaa dibedda ayadoo raaceyso nidaamka iyo Sharciyada Dalka.

4. Waxay xiriir wax qabsi, iskaashi ama ganacsi la yeelan kartaa Hay'adaha Caalamiga, Shirkadaha gaar ahaaneed ama Dawladaha xiriirka wanaagsan la leh Dawladda Soomaaliyeed, gaar ahaanna dhanka maalgelinta, farsamada daawa samaynta casriga ah.

5. Wuxuu qaadi karaa Maamulka Warshadda tallaabo kasta ee lagama maarmaan u ah sidii loo gaari lahaa sare u qaadidda tayada tacab soo saarka, socodsiinta hawlaha marka laga eego xagga farsamada, maamulka iyo ganacsiga.

6. Kaddib markii oggolaasho ka hesho Wasiirka Wasaaradda Warshadaha iyo Ganacsiga, Warshadda waxaa u furan mar allaale markii dan la moodo in ay Warshaddu noqoto Shirkad Saamiley ah oo u furan cid kasta oo doonaysa in ay sahmi ku yeelato.

Qod. 3aad
*(Xarunta Warshadda)*

Xarunta Warshaddu waa Magaalo-madaxda Muqdisho, Waddada aadda Afgooye, Km. 7, halkaasoo ay Warshaddu ka dhisan tahay.

Qod. 4aad
*(Habka qaabka dhismaha Warshadda)*

1. Warshaddu waxay yeelan doontaa Maareeye Guud oo lagu magacaabo Decreeto Madaxweyne, isagoo tixgelinaaya Ra'yiga Wasiirka Wasaaradda Warshadaha iyo Ganacsiga.

2. Si ay ugu gudubto Warshaddu hawsha loo xilsaaray, waxay kaloo yeelanaysaa Waaxyo, Qaybo iyo Xubno.

Qod. 5aad
*(Xilka Maareeyaha Guud)*

Maareeyaha Guud waxaa loo xilsaaray, asagoo matalaaya Warshadda, fulinta ujeeddooyinka ku cad Qodobka 2aad ee Sharcigan; Hawshiisu waxay tahay:

— Inuu fuliyo siyaasadda Dawladda iyo tan Xisbiga.

— Inuu saxiixo heshiisyada ay Warshaddu dhinac ka tahay asagoo oggolaasho ka haysta Wasiirka.

— Wuxuu mas'uul ka yahay habka maamulka shaqada, Warshadda iyo lacagta wuxuuna awood u leeyahay inuu qaato wixii qaraar ah ee ku saabsan habsami u fulinta hawlaha la xiriira Maamulka Warshadda, asagoo ku saleynaayo go'aammadiisa Shuruucda Dalka.

Qod. 6aad
*(Habka maamulka shaqada iyo shaqaalaha)*

1. Marka laga reebo Maareeyaha Guud, waxaa lagu maamulayaa Shaqaalaha Warshadda Sharciga lambarkiisu yahay 26 ee soo baxay 5.7.1984 iyo Sharciga tirsigiisu yahay 65 ee soo baxay 10/10/1972 (Codice del Lavoro) iyo Heshiiska wadajireed ee dhexmaray 1.9.1984 Maamulka Warshadda iyo Shaqaalaha.

Qod. 7aad
*(Hantida Warshadda)*

Hantida Warshaddu waxay ka kooban tahay :

1. Lacag ay Dawladdu u qoondaysay in lagu wado hawlaha Warshadda iyo mashaariicda.
2. Hantida guurtada ah iyo midda maguurtada ah ee Warshadda.
3. Dakhliga ka soo gala warshadda hawlaheeda, mashaariicdeeda, barnaamijyadeeda iyo adeegyada ay qabato.
4. Deymanka warshaddu ay qaadato.
5. Deeqaha iyo kaalmada warshaddu ay ka hesho dalka gudihiisa iyo dibedda.

Qod. 8aad

*(Miisaaniyadda Warshadda)*

1. sannad-miisaaniyadeedka warshaddu wuxuu ka bilaabanayaa 1da Jennaayo wuxuuna ku dhammaanayaa 31ka Disember ee sannad walba.
2. Ugu dambeyn 30ka Oktoobar ama inta ka horreysa ee sannad kasta waa in uu isku soo dubbaridaa maamulka warshaddu miisaaniyadda caadiga ah iyo tan horumarinta ee ku saabsan sannadka soo socda asagoo faahfaahinaya xaaladda xisaab-eed ee warshadda, waxaana loo gudbinayaa Wasiirka Wasaar-adda Warshadaha iyo Ganacsiga iyo Maaliyadda si lo saxiixo.

Qod. 9aad
*(Xiritaanka miisaaniyadda)*

1. Maamulka Warshadda waxaa waajib ku ah marka ay tahay 31ka Maarso ama inta ka horreysa sannad kasta inuu skudub-baridaa xiritaanka miisaaniyadda sannadka la soo dhaafay.
2. Xisaab-xirka waxaa loo gudbinayaa Wasaaradda Maaliyadda si loo waafajiyo habka iyo nidaamka u degsan xisaab-xirka Hay'adaha Dawladda.

Qod. 10aad
*Amaah*

Warshaddu, iyadoo haysata oggolaanshaha Wasiirka Wasaaradda warshada iyo Gnacsiga, waxay amaah ka qaadan kartaa Bankiyada dalka iyo hay'adaha kale si ay u hirgeliso ujeeddooyinka loo dhisay.

Qod. 11aad
*(Ilaalinta sare)*

Wasiirka Wasaaradda Warshadaha iyo Ganacsigu wuxuu awood u leeyahay ilaalinta habsami u fulinta maamulka warshadda sagoo raacaya awoodaha ku tilmaaman sharciyada hay'adaha madax-bannaan ee dawladda. Waxayna warshaddu si toos ah u hoos imaaneysaa Wasiirka.

Qod. 12aad
*(Qoritaanka shaqaalaha)*

Warshaddu waxay qoran kartaa shaqaalaha ay u baahan tahay iyadoo raaceysa habka sharciga (Codice del Lavoro) shaqo qorista warshadaha dawladda.

Qod. 13aad
*(Xeer hoosaad)*

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, isagoo dhegeystay soo jeedinta Wasiirka wuxuu soo saaraya Xeer-hoosaad dhammeystiraya, nidaamiyana habsami u fulinta sharciga.

Qod. 14aad
*(Burin sharci)*
Sharci kata ama xer kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin sharcigan waa la buriyey.

Qod. 15aad
*Dhaqan-gal)*

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla markuu saxiixo Madaxweynaha waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 17 Jan. 1987

**MADAXWEYNAHA J.D.S.**
**(Maxamed Siyaad Barre)**

# QAYBTA LABAAD

**Xeer Madaxweynaha JDS, lr. 18 ee 1 Maarso 1987**
**Abaalmarinno Billaded oo lagu maamuusay Xiriirka Guud ee Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed iyo Ururrada hoos yimaada.**

MADAXWEYNAHA J.D.S.

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAY: | Qodobka 82aad ee Dastuurka JDS; |
| MARKUU ARKAY: | Sharciga lam. 65 ee 19ka Oktoobar 1970 ee Abaalmarinta; |
| MARKUU TIXGELIYEY: | Qoraallada iyo warbixinnada Xiriirka Guud Urur. Sh. Soomaaliyeed; |
| MARKUU TIXGELIYEY: | Dadaalka iyo wax-qabadka ay muujiyeen Xiriirka Guud Urur.Shaqaalaha Soomaaliyeed iyo Ururrada hoos yimaada muddadii ay soo jireen oo haatan 10 jirsatay, loona dabbaaldegayo 10 guuradeedii; |
| MARKUU TIXGELIYEY: | In ay lagama maarmaan tahay in hay'addii ama hay'adihii ku shaqeeyey kacaannimo, waddaninimo, hawlkarnimo, niyadsami ayagoo u gutay si hagar la'aan waajibaadkii ka saarnaa dalkooda, ummaddooda iyo shaqaalihii ay wakiilka ka ahaayeen la guddoonsiiyo aqoonsiga ay ka mudan yihiin Kacaankooda, lagana reebo raad raac wax ku ool leh; |
| MARKUU TIXGELIYEY: | Talada Guddiga Abaalmarinta MJDS. |
| WUXUU SOO SAARAY: | |

Qod. 1aad

In lagu maamuuso **Billad Dahab Hawlkarnimo ah,** Xiriirka Guud ee Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed.

Qod. 2aad

In la maamuuso **Billad Qalin hawlkarnimo ah** urur kasta ee hoos ku qoran:

— Ururka Shaqaalaha Dhismaha iyo Xoogga Korontada.
— Ururka Shaqaalaha Gaadiidka, Isgaarsiinta iyo Warfaafinta.
— Ururka Shaqaalaha Warshadaha iyo Macdanta.
— Xiriirka Ururrada Shaqaalaha Gobolka Waqooyi Galbeed, iyo
— Xiriirka Ururrada Shaqaalaha Gobolka Shabeellaha Dhexe.

Qod. 3aad

In lagu maamuuso **Billad Maar Hawlkarnimo ah** urur kasta oo hoos ku qoran:-

— Ururrada Shaqaalaha Beeraha iyo Xoolaha.
— Ururrada Shaqaalaha Maamulka iyo Arrimaha Bulshada.
— Ururrada Shaqaalaha Ganacsiga iyo Maaliyadda.
— Ururrada Dawladaha Hoose Dalxiiska iyo Hoteellada.
— Ururka Shaqaalaha Gobolka Banaadir.
— Ururka Shaqaalaha Degamda Balcad.
— Ururka Shaqaalaha Degmada Berbera.
— Ururka Shaqaalaha Degmada Jilib.

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu soo saxiixo Madaxweynaha JDS.

Muqdisho 1.5.1987

**Jaalle Maxamed Siyaad Barre**
**Madaxweynaha JDS**

**Xeer Madaxweynaha JDS Lr. 19 Abril 1987 — Magacaabid - kala beddelid iyo dib u celin Hawlwadeenno:-**

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qod. 28aad ee Dastuurka JDS.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lam. yahay 3 soona baxay 10ii Jannaayo 1970kii, kuna saabsan dhismaha MBD iyo beddelaaddii ku dhacay.

MARKUU TIXGELIYEY: Talo soo jeedinta Guddoomiyahay MBD tirsigeedu yahay kuna saabsanayd magacaabid iyo dib u celin hawlwadeenno.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:-

Qod. 1aad

1. G/Sare Cali Maxamed Maxamuud (Cali Aboolo) oo ka tirsan Ciidanka XDS waxaa loo magacaabay in uu Garsoore ka noqdo MBD ee Xamar.

2. G/Sare Maxamuud Maxamed Macallin (Adeer) oo ka tirsan Ciidanka XDS, waxaa loo magacaabay inuu Garsoore ka noqdo MBD ee Xamar.

3. G/Sare Cali Maxamed Axmed (Cali Baadiye) oo Guddoomiye ka ahaa MB Gobolka Sh/Hoose, waxaa loo magacaabay inuu Garsoore ka noqdo MBD ee Xamar.

4. G/Dhexe Cabdulle Cali Calasow oo Garsoore ka ahaa MBD ee Xamar, waxaa loo magacaabay Guddoomiyaha MB Gobolka Sh/Hoose.

5. G/le Cabdullaahi Cabdi Xasan oo ku-xigeen Xeer Ilaaliye ka ahaa MBD ee Xamar, waxaa dib loogu celiyey Ciidanka Booliska Soomaaliyeed.

6. Dhamme Dr. Axmed Xaaji Ibraahim Xuseen oo Garsoore ka ahaa MBD ee Xamar, waxaa dib loogu celiyey Wasaaradda Gaashaandhigga oo uu ka tirsan yahay.

Qod. 2aad

Dekreetadan waxay dhaqan gelaysaa, marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Waan aragnay ee Diiwaangelinnay, diiwaanka L. 3 bog. L. 249.
Muqdisho, 30 Abriil 1987
Hantidhawrka Guud
Dr. Xuseen Cabdulle Cali

Muqdisho, 19 Abril 1987

**Madaxweynaha JDS**
**(J/le Maxamed Siyaad Barre)**

**Xeer Madaxweyne JDS Lr. 20 ee 6 Maajo 1987**
**Mashaariicda Kaalmada ee Talyaaniga (ENFAIS)**

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya

MARKUU ARKAY: Sharciga lagu dhisay Wasaaradda Arrimaha Dibadda

MARKUU ARKAY: Sharciga lagu dhisay Hay'adda Mashaariicda Kaalmada Talyaaniga (ENFAIS)

MARKUU ARKAY: Taladii uu soo jeediyay Wasiirka Arrimaha Dibadda

WUXUU GO'AAMIYAY

1. In Mashaariicda isku dhafka ah ee beeraha iyo Xoolaha ee laga hirgelinayo Degmooyinka Jawhar iyo Afgooye iyo Mashaariicda Horumarineed ee Kalluumeysiga (Sec iyo qaboojiyayaasha Baraawe) ee ay dhammaantood maalgelinayso Dowladda Talyaanigu maamul ahaan la hoos geeyo Hay'adda Mashaariicda Kaalmada Talyaaniga (ENFAIS).

2. Dhammaan Mashaariicda Horumarineed ee ay noo maalgeliyaan dalalka aynu saaxiibka nahay waxay hoos imaanayaan isla hay'addaan.

3. Waxaan ku magacaabay Ing. Munye Saciid Cumar Maareeyaha Guud ee Mashaariicdaas.

4. Dekretadani waxay dhaqan galaysaa markuu saxiixo Madaxweynaha JDS waxaana lagu soo saarayaa faafinta rasmiga ah ee Dowladda.

Waan aragnay ee Diiwaangelinnay, diiwaanka L. 1 bog. L. 41.
Muqdisho, 11 Maarso 1987
Hantidhawrka Guud
Dr. Xuseen Cabdulle Cali

**Wasiirka W. Arrimaha Dibadda**
**Cabduraxmaan Jaamac Barre**

**J/le Maxamed Siyaad Barre**
**Madaxweynaha JDS.**

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

## QAYBTA MADANIGA

## G U D D O O M I Y A H A

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Axmed Geedi Cilmi.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg/War. Lr. 0353916, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000, kuna qoran magaca J/le Cabdiraxmaan Sheekh Da'uud sida ku cad war. lr. 10753 ee tr. 10/5/87 ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, Qeybta Xis. Guud.

WUXUU XEEREEYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Jeeg/War. Lr. 0353916 lagana sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Berbera kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000, kuna qoran magaca Jaalle Cabdiraxmaan Sh. Daa'uud Sh. Cabdi.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta Berbera in ay siiso J/le Axmed Geedi Cilmi lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 50.000 oo ah beddelkii J/War. kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah J.D.S., haddii inta ka horreysa wax is-hortaag ah aan ka iman, ama la keenin.

Muqdisho, 13/5/87

**Kaal. Maxkamadda**
**Maryan Cab/Ilahi Nuur**

**Gudd. Maxkamadda G/Banaadir**
**Dr. Cabdi Salaad Shongole**

**MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR**

**QAYBTA MADANIGA**

**G U D D O O M I Y A H A**

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Cabdiraxmaan Maxamed Cali.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg/War. Lr. 0112814, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 48.000, kuna qoran magaca J/le Cabdiraxmaan Maxamed Cali sida ku cad war. lr. 11002 ee tr. 14/5/87 ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, Qeybta Xis. Guud.

WUXUU XEEREEYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Jeeg/War. Lr. 0112814 lagana sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Balcad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 48.000, kuna qoran magaca Jaalle Cabdiraxmaan Maxamed Cali.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta Balcad in ay siiso J/le Càbdiraxmaan Maxamed Cali lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 48.000 oo ah beddelkii J/War. kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah J.D.S., haddii inta ka horreysa wax is-hortaag ah aan ka iman, ama la keenin.

Muqdisho, 16/5/87

**Kaal. Maxkamadda**
**Maryan Cab/Ilahi Nuur**

**Gudd. Maxkamadda G/Banaadir**
**Dr. Cabdi Salaad Shongole**

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

### QAYBTA MADANIGA

### GUDDOOMIYAHA

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Cabdulqaadir Maxamed Muuse.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg/War. Lr. 0783758, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000, kuna qoran magaca J/le Cabdulqaadir Maxamed Muuse sida ku cad war. lr. 11260 ee tr. 19/5/87 ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, Qeybta Xis. Guud.

WUXUU XEEREEYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Jeeg/War. Lr. 0783758 lagana sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Labaad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000, kuna qoran magaca Jaalle Cabdulqaadir Maxamed Muuse.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta Labaad in ay siiso J/le Cabdulqaadir Maxamed Muuse lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 100.000 oo ah beddelkii J/War. kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah J.D.S., haddii inta ka horreysa wax is-hortaag ah aan ka iman, ama la keenin.

Muqdisho, 23/5/87

**Kaal. Maxkamadda**
**Maryan Cab/Ilahi Nuur**

**Gudd. Maxkamadda G/Banaadir**
**Dr. Cabdi Salaad Shongole**

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

**Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Banaadir**

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Aweys Sheekh Cusmaan.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg/War. Lr. 615861, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 5.000, kuna qoran magaca Wasaaradda Xannaanada Xoolaha sida ku cad war. lr. 3482 ee tr. 8/4/87 ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, Laanta Labaad.

WUXUU XEEREEYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Jeeg/War. Lr. 615861 lagana sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Labaad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 5.000, kuna qoran magaca Wasaaradda Xannaanada Xoolaha.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta Labaad in ay siiso J/le Aweys Sheekh Cusmaan lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 5.000 oo ah beddelkii J/War. kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah J.D.S., haddii inta ka horreysa wax is-hortaag ah aan ka iman, ama la keenin.

Muqdisho, 22/4/87

**Kaal. Maxkamadda**
**Maymuun Max'ud Max'ed**

**Gudd. Maxkamadda G/Banaadir**
**Dr. Cabdi Salaad Shongole**

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

**Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Banaadir**

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Maxamed Cilmi Cawad.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Buug/Kayd Lr. 52, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 22.274,04, kuna qoran magaca J/le Maxamed Cilmi Cawad sida ku cad war. lr. 000 ee tr. 29/4/87 ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, Laanta Koowaad.

WUXUU XEEREEYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Buug/Kayd Lr. 52 lagana sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Kowaad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 22.274,04, kuna qoran magaca J/le Maxamed Cilmi Cawad.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta Kowaad in ay siiso J/le Maxamed Cilmi Cawad lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 22.274,04 oo ah beddelkii Buug/Kayd kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah J.D.S., haddii inta ka horreysa wax is-hortaag ah aan ka iman, ama la keenin.

Muqdisho, 3/5/87

**Kaal. Maxkamadda**
**Maymuun Max'ud Max'ed**

**Gudd. Maxkamadda G/Banaadir**
**Dr. Cabdi Salaad Shongole**

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

**Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Banaadir**

| | |
|---|---|
| HADDUU ARKAY: | Arjiga uu soo qortay J/le Maxamed Saciid Axmed. |
| HADDUU TIXGELIYEY: | In uu lumay Buug/Kayd Lr. 27118, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 99/100"8,894.99, kuna qoran magaca J/le Maxamed Saciid Axmed sida ku cad war. lr. 002459 ee tr. 16/3/87 ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, Xarunta. |
| HADDUU ARKAY: | Qod. 96 Sharciga lam. 2 ee tr. 9/9/1962kii. |

WUXUU XEEREEYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Buug/Kayd Lr. 27118 lagana sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Xarunta kuna jirto lacag dhan Sh.So. 99/100"8,894.99, kuna qoran magaca J/le Maxamed Saciid Axmed.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Xarunta in ay siiso J/le Maxamed Saciid Axmed lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 99/100"8,894.99, oo ah beddelkii Buug/Kayd kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah J.D.S., haddii inta ka horreysa wax is-hortaag ah aan ka iman, ama la keenin.

Muqdisho, 21/3/87

| | |
|---|---|
| **Kaal. Maxkamadda** | **Gudd. Maxkamadda G/Banaadir** |
| **Maymuun Max'ud Max'ed** | **Dr. Cabdi Salaad Shongole** |

**MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER BURCO**

**Uj: Baafin Jeegga Warega ee lam. 0459553**

**Guddoomiyaha Maxkamadda G/Togdheer Burco**

HADDUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Baafin Jeeg lumay.

HADDUU ARKAY: Ogeysiinta Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco 5/5/87.

HADDUU ARKAY: Qod. 96 D.L. 9/9/1985kii, lumid Jegga Wareega ee kor ku xusan kuna qornayd Canbaro Axmed Cilmi kuna jirtay Sh. So. 50.000, tr. tahay 12/4/87.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusbooneysiiyo Jeeggaas Wareega ee kor ku xusan J/le Canbaro Axmed Cilmi markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 20 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah J.D.S., haddii inta ka horreysa wax is-hortaag ah aan ka iman, ama la keenin.

WAXAA LAGA CODSANAYAA

In Jeegga cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro J/le Canbaro Axmed Cilmi.

Burco, 5/5/87

**Kaal. Max. G/Togdheer**
**Jaamac Cabdullaahi Bile**

**Gudd. Max. G/Togdheer**
**Dr. Cabdullaahi Islaw Cumar**

## MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER

MGT/14/87 Tr.25/5/87.

BAAFIN BUUG KAYD Lr. 2913/7

## GUDDOOMOYAHA MAXKAMADDA G/TOGDHEER

MARKUU ARKAY : Arjiga Tr. tahay 25/5/87 ee uu soo qortay Ibraahim Qaalib guutaale, kaasoo ku soo codsaday in loo sameeyo B/Keyd ee Lam. yahay 2913/7. oo lumay, Xanbaarsanaana Lacag dhan Sh. So. 239.125/- kuna qoran codsadaha.

MARKUU ARKAY : Qod. 59-L. D. Lumid.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo B/Kaydka Lumay ee Lr. yahay 2913/7 ee xambaarsan Lacagta Dhan Sh. So. 239.125/- ee ka lumay Jaalle Ibraahim Qaalib Guutaale.

Gacantanna laga saaro marka ay ka soo wareegto 20, casho gudahooda oo lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah.

**Gudd. Maxkamadda G/Togdheer Burco**
**(Dr. Abokor Islaw Cumar)**

**(X-X- Sugulle)**
**Kaal. Maxkamadda G/Togdheer Burco**

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

**Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Banaadir**

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Maxamed Nuur Xuseen.

HADDUU ARKAY: In uu lumay Buug/Kayd Lr. 478, lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, Laanta W/dhiigley kuna qoran lacag dhan Sh. So. 2.897,54 uuna iska lahaa J/le Maxamed Nuur Xuseen, sida ku cad warqadda lamb. yahay 103 taariikhdeeduna tahay 27/3/86 ee Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley.

HADDUU ARKAY: Qod. 96 Sharciga lam. 2 ee tr. 9/9/1965kii.

WUXUU XEEREEYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Buug/Kayd Lr. 478 lagana sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta W/dhiigley kuna qoran magaca J/le Maxamed Nuur Xuseen ayna ku jirto Sh. So. 2.897,54.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley in ay siiso J/le Maxamed Nuur Xuseen lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 2.897,54, oo ah beddelkii Buug/Kayd kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah J.D.S., haddii inta ka horreysa wax is-hortaag ah aan ka iman, ama la keenin.

Muqdisho, 29/8/86

**Gudd. Maxkamadda G/Banaadir**
**Dr. Cabdi Salaad Shongole**

**MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR**

**QAYBTA MADANIGA**

**Guddoomiyaha Maxkamadda G/Banaadir**

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Ciise Cabdi Rooble.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg/War. Lr. 0460900, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 30.000, kuna qoran magaca J/le Ciise Cabdi Rooble sida ku cad war. lr. 11497 ee tr. 24/5/87 ee soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, Qeybta Xis. Guud.

WUXUU XEEREEYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Jeeg/War. Lr. 0460900 lagana sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco kuna jirto lacag dhan Sh.So. 30.000, kuna qoran magaca Jaalle Ciise Cabdi Rooble.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta Burco in ay siiso J/le Ciise Geedi Cilmi lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 30.000 oo ah beddelkii J/War. kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah J.D.S., haddii inta ka horreysa wax is-hortaag ah aan ka iman, ama la keenin.

Muqdisho, 24/5/87

**Kaal. Maxkamadda**
**Maryan Cab/Ilahi Nuur**

**Gudd. Maxkamadda G/Banaadir**
**Dr. Cabdi Salaad Shongole**

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

## QAYBTA MADANIGA

### Guddoomiyaha Maxkamadda G/Banaadir

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Cabdullaahi Jaamac Nuur

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg/War. Lr. 0435381, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 30.000, kuna qoran magaca J/le Cabdullaahi Jaamac Nuur sida ku cad war. lr. ee tr. 24/5/87 ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, Qeybta Xis. Guud.

WUXUU XEEREEYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Jeeg/War. Lr. 0435381 lagana sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Koowaad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 30.000, kuna qoran magaca Jaalle Cabdullaahi Jaamac Nuur.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta Koowaad in ay siiso J/le Cabdullaahi Jaamac Nuur lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 30.000 oo ah beddelkii J/War. kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah J.D.S., haddii inta ka horreysa wax is-hortaag ah aan ka iman, ama la keenin.

Muqdisho, 25/5/87

**Kaal. Maxkamadda**
**Maryan Cab/Ilahi Nuur**

**Gudd. Maxkamadda G/Banaadir**
**Dr. Cabdi Salaad Shongole**

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

## QAYBTA MADANIGA

**Guddoomiyaha Maxkamadda G/Banaadir**

HADDUU ARKAY: Arjiga ay soo qoratay J/le Xabiiba Maxamed Yuusuf.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg/War. Lr. 502966, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 30.000, kuna qoran magaca J/le Xabiiba Maxamed Yuusuf sida ku cad war. lr. 11019 ee tr. 14/5/87 ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, Qeybta Xis. Guud.

WUXUU XEEREEYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Jeeg/War. Lr. 502966 lagana sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco kuna jirto lacag dhan Sh.So. 30.000, kuna qoran magaca Jaalle Xabiiba Maxamed Yuusuf.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta Burco in ay siiso J/le Xabiiba Maxamed Yuusuf lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 30.000 oo ah beddelkii J/War. kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah J.D.S., haddii inta ka horreysa wax is-hortaag ah aan ka iman, ama la keenin.

Muqdisho, 23/5/87

**Kaal. Maxkamadda**
**Maryan Cab/llahi Nuur**

**Gudd. Maxkamadda G/Banaadir**
**Dr. Cabdi Salaad Shongole**

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

## QAYBTA MADANIGA

**Guddoomiyaha Maxkamadda G/Banaadir**

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Cabdi Maxamed Cali.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg/War. Lr. 0307902, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000, kuna qoran magaca J/le Cabdi Maxamed Cali sida ku cad war. lr. 11747 ee tr. 31/5/87 ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, Qeybta Xis. Guud.

WUXUU XEEREEYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Jeeg/War. Lr. 0307902 lagana sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Dh/Mareeb kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000, kuna qoran magaca Jaalle Cabdi Maxamed Cali.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta Dh/Mareeb in ay siiso J/le Cabdi Maxamed Cali lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 100.000 oo ah beddelkii J/War. kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah J.D.S., haddii inta ka horreysa wax is-hortaag ah aan ka iman, ama la keenin.

Muqdisho, 1/6/87

**Kaal. Maxkamadda**
**Maryan Cab/Ilahi Nuur**

**Gudd. Maxkamadda G/Banaadir**
**Dr. Cabdi Salaad Shongole**

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

## QAYBTA MADANIGA

**Guddoomiyaha Maxkamadda G/Banaadir**

| | |
|---|---|
| HADDUU ARKAY: | Arjiga uu soo qortay J/le Cismaan Ayaanle Maxamuud. |
| HADDUU TIXGELIYEY: | In uu lumay Jeegag/War. Lrs. 818143, 430016 iyo 430017 kuna jirto lacag dhan min Sh.So. 100.000, 50.000 iyo 28.000 isugeyn (178.000) kuna qoran magaca J/le Saciid Maxamed Yaasiin sida ku cad war. lrs. 81843 iyo 11748 ee tr. 31/5/87 ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, Laanta Wardhiigley. |

WUXUU XEEREEYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Jeegag/War. Lrs. 818143, 430016 iyo 430017 lagana sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000, 50:000 iyo 28.000, kuna qoran magaca Jaalle Saciid Maxamed Yaasiin.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta Wardhiigley in ay siiso J/le Cismaan Ayaanle Maxamuud lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 100.000, 50.000 iyo 28.000 oo ah beddelkii Jeegag/War. kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah J.D.S., haddii inta ka horreysa wax is-hortaag ah aan ka iman, ama la keenin.

Muqdisho, 1/6/87

**Kaal. Maxkamadda**
**Maryan Cab/llahi Nuur**

**Gudd. Maxkamadda G/Banaadir**
**Dr. Cabdi Salaad Shongole**

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

### QAYBTA MADANIGA

**Guddoomiyaha Maxkamadda G/Banaadir**

| | |
|---|---|
| HADDUU ARKAY: | Arjiga uu soo qortay J/le Cabdulqaadir Maxamed Muuse. |
| HADDUU TIXGELIYEY: | In uu lumay Jeegag/War. Lrs. 0781552 iyo 0779346, kuna jirto lacag dhan min Sh.So. 100.000 iyo (200.000) kuna qoran magaca J/le Cabdulle Cabdalla Jaamac sida ku cad war. Ir. 11842 ee tr. 1/6/87 ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, Qeybta Xis. Guud. |

WUXUU XEEREEYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Jeegag/War. Lrs. 0781552 iyo 0779346 lagana sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa kuna jirto lacag dhan Sh.So. 200.000, kuna qoran magaca Jaalle Cabdulle Cabdalla Jaamac.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta Hargeysa in ay siiso J/le Cabdulqaadir Maxamed Muuse lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 200.000 oo ah beddelkii Jeegag/War. kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah J.D.S., haddii inta ka horreysa wax is-hortaag ah aan ka iman, ama la keenin.

Muqdisho, 1/6/87

**Kaal. Maxkamadda**
**Maryan Cab/Ilahi Nuur**

**Gudd. Maxkamadda G/Banaadir**
**Dr. Cabdi Salaad Shongole**

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

## QAYBTA MADANIGA

**Guddoomiyaha Maxkamadda G/Banaadir**

HADDUU ARKAY: Arjiga ay soo qoratay J/le Xaawa Ibraamih Barre.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay B/Kayd Lr. 2582, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca J/le Xaawa Ibraahim Barre sida ku cad war. Ir. la'aanta ee tr. 3/6/87 ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, Laanta Wardhiigley.

WUXUU XEEREEYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) J/War, B/Kaydka Lr. 2582 lagana sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000, kuna qoran magaca Jaalle Xaawa Ibraahim Barre.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta Wardhiigley in ay siiso J/le Xaawa Ibraahim Barre, lacagta cadadkeedu tahay Sh.So. 50.000 oo ah beddelkii B/Kayd kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah J.D.S., haddii inta ka horreysa wax is-hortaag ah aan ka iman, ama la keenin.

Muqdisho, 3/6/87

**Gudd. Maxkamadda G/Banaadir**
**Dr. Cabdi Salaad Shongole**

## MAXKAMADDA GOBOLKA W/GALBEED HARGEYSA

**Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka W/Galbeed Hargeysa**

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Axmed Cali Miigane ku simaha Wakiilka Air Djabouti ee ku taariikhaysan 8/2/87, uuna ku cod-sanayo in loo cusbooneysiiyo J/Wareega ee lumay lr. 0265960 tr. 21/7/86, lacagti-isuna tahay Sh. So. 50.000

MARKUU ARKAY: Taarka Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed lamb. yahay 000154, tr. 18/2/87 ee ay ku soo caddeeyeeb in J/War. ee lumay leeyahay astaamaha ujeeddada sare ku xusan.

MARKUU ARKAY: In J/War. ee lumay lacagtiisa iska leeya-hay Shirkadda Air Djabouti.

MARKUU ARKAY:

Qodobbada 69/70 ee Xeerka lam. yahay 2 ee soo baxay 9/9/65kii.

W U X U U

Go'aamiyey in la baabi'iyo J/War. ee lumay lam. 0265960 loona cusbooneysiiyo gacantana laga saaro Shirkadda Air Djabouti ama ciddii awood buuxda ka haysataya muddo 15 maalmood gudahood ah, ka dib maalinta Faafinta lagu soo saaro.

WAXAA LA AMRAYAA

Maamulaha Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa in uu Nuqulka go'aankan ku dhejiyo Bankiga iridihiisa si ciddii haysata J/War. ee lumay ay uga soo qortaan cabasho haddii ay doonaan.

Hargeysa, 22/2/87

**Kaal. Maxkamadda**
**Xuseen Ismaaciil Axmed**

**Gudd. Max. G/W/Galbeed**
**Ibraahim Faarax Max'ed**

## GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER

MGT/82/87 Burco 4/5/1987.

**BAAFIN BUUG KAYD Lr. 1492/4**

**GUDDOOMOYAHA MAXKAMADDA G/TOGDHEER**

**MARKUU ARKAY :** Dacwad ku saabsan Baafin Buugga Keydka ee Lamb. 1492/4 ee ka lumay ee uu soo codsaday Axmed Cali Cusmaan.

**HADDUU ARKAY :** Ogeysiinta Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed L. Burco ee Taar. 3/5/87.

**HADDUU ARKAY:** Qod. 69, D.L. (9-9-65) lumid Buugga Kaydka ee lumay lambarkiisuna yahay 1492/4, kuna jirtay Sh. So. 71.717, lagana sameeyey Laanta Burco, kuna qoran Axmed Cali Cusmaan.

**(WUXUU GO'AAMIYEY)**

In loo cusboonaysiiyo Buuggaas Jaalle Axmed Cali Cusmaan, laguna shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Waxaa laga codsanayaa Bankiga Ganacsiga Burco in Buugga Cusub ee la doonayo gacanta laga saaro Jaalle Axmed Cali Cismaan muddo aan ka badnayn 20 maalmood.

**(Jaamac C/Ilaahi Bile)**
**Kaaliyaha**
**Max. G/Togdheer Burco**

**(Dr. Abuukar Islow Cumar)**
**Guddoomiyaha**
**Max. G/Togdheer Burco**

## SHIRKADDA "SOMALI BOTTLING COMPANY" — HARGEYSA —

## ISU YEERID SHIR GUUD

Saamileyda Shirkadda **"SOMALI BOTTLING COMPANY"** oo saldhiggeda yahay Hargeysa, waxaa la isugu yeerayaa shir caadi ah iyo mid caadi dhaaf ah maalinta 30ka Juunyo 1987, saacadduna tahay 9ka gelinka hore ee Xarunta Shirkadda sida qaraar looga gaaro arrinta kala ah:

**SHIR CAADI AH:**

1. Miisaaniyadda 1986.
2. Doorashada Guddiga Maamulka.
3. Wixii kaloo soo raaco.

**SHIR CAADI DHAAF AH:**

1. Kordhinta Rasumaalka Shirkadda.
2. Wax ka beddelid Xeerka Shirkadda.

Wixii fadhigaas hore ay ka soo qayb geli waayaan cadadka saamileyda uu sharciga dalbayo, waxaa mar labaad shir la isugu imaanayaa maalinta ay bisha tahay 8da Luulyo 1987 isla saacadda iyo Xarunta kor lagu tilmaamay.

Guddoomiyaha Ahna Maamulaha Idman
*Maxamuud Axmed Maxamed "Wiliiq"*